

## Kormeerka Suuqa Daryeelka Caafimaadka

# Kroger iyo Albertsons Merger

Barnaamijka [Kormeerka Suuqa Daryeelka Caafimaadka \(Health Care Market Oversight\)](#) (HCMO) waxa uu naqdiyaa shaqada daryeelka caafimaadka, sida isku biirka iyo iibsiga, si loo xaqiijiyo inayna wax yeelin dadka iyo bulshooyinka Oregon. Agoosto 8, 2023, Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxay heleen [wargelinta](#) la xidhiidhka iibsiga Kroger ee of Albertsons. Wargelinta waxay sharaxaysaa qorshayaasha shirkadaha inay isku biiraan ah.

## Sideed ugu lug leh?

**Kroger** waxaa weeye shirkado shacab oo ka shaqaysa subermaarkeetyada 35 gobol oo magacyo kala duwan leh, oo waxaa kamid ah Fred Meyer iyo QFC. Kroger waxaa weeye subermaarkeetyada ugu wayn. Badi tukaanada Kroger waxaa kamid ah farmasiyo, oo waxaa kamid ah 53 farsami oo ku yaala Oregon oo ku dhax yaala tukaanada Fred Meyer iyo QFC. Kroger sidoo kale waxa uu maamulaa gunada farsamiga iyo ganacsiga farsami dalabka boosta.

**Albertsons** waxaa weeye shirkado shacab oo ka shaqaysa subermaarkeetyada 34 gobol oo magacyo kala duwan leh, oo waxaa kamid ah Safeway, Albertsons, iyo Sav-On. Badi goobaha subermaarkeetyada Albertsons ay leeyihiin waxay leeyihiin farsamiyo, oo waxaa kamid ah 106 farsami oo ku yaala tukaanada Oregon. Albertsons sidoo kale waxa uu bixiyaa adeegyada daawaynta taleefanka iyada oo lala kaashanayo Adeegyada iyo Caafimaadka Degmada.

**C&S Wholesale Grocers (“C&S”)** waxaa weeye shirkad gaar loo leeyahay oo diirada saarka iibka cuntada. C&S waxay ka iibisaa tukaano cunto oo madax banaan iyo kuwa shirkado waawayn leeyihiin. Sidoo kale waxay maamushaa tukaano cunto oo ku yaala gobolkada Badhtame galbeed iyo Carolinas.

## Macluumaadka ku saabsan heshiiska

Kroger waxa uu bixin doonaa \$24.6 bilyan oo uu ku iibsano doonaa Albertsons. Inta heshiisku socdo, Kroger waxa uu qaadan doonaa \$4.7 bilyan oo daynta Albertsons ah. Hay'aduhu waxay sheegeen in ujeedada iibkan uu yahay in la abuurdo tartan oo shirkad la iskugu keeno. Wargelintan, Kroger waxa uu sheegey in ayna jirin wax qorshayaal ah oo lagu yaraynayo daryeelka caafimaadka ama adeegyada farsamiga ee Oregon. Si looga jawaabo tabashooyinka maamulka gobolka iyo federalka ee isku biiridu inay yaraynayso tartanka tukaanada raashinka, hay'adaha waxaa u qorshaysan inay ka iibiyaan (“ku wareejiyaan”) wax ka badan 400 oo tukaanada Albertsons iyo Kroger C&S, oo waxaa kamid ah 49 tukaanku yaala Oregon.

## Maxaa xiga?

OHA waxay eegi doontaa heshiiskan si ay u fahanto sida ay u saamayn karto daryeelka farsamiga iyo helitaanka dawooyinka la qoro ee bulshooyinka Oregon. Inta la naqdinayo, OHA waxay isticmaali doonaa xogta daryeelka caafimaadka, wararka iyo warbixinaha saxaafada, macluumaadka shirkadaha, iyo xogta laga heley shacabka marka ay go'aaminayso in heshiiskan la ansixiyo. Kadib markii la naqdiyo, OHA waxay soo saari doonaa go'aanka ku saabsan hadii heshiiska lagu soconayo sida loo qorsheeyay. Heshiiskan sidoo kale waxaa naqdinaya maamulada kale ee federalka iyo gobolka.

## Waxa aanu doonaynaa in aanu helno xogtaada!

Fikirkaagu waxa uu naga caawinayaa in aanu fahano sida heshiiskan uu u caawin karo ama u waxyeeli karo dadka bulshadaada. Si aad noola wadaagto fikirkaaga iyo aragtidaada ku saabsan heshiiskan, fadlan iimeel u dir [hcmo.info@oha.oregon.gov](mailto:hcmo.info@oha.oregon.gov). Iimeelkaaga, waxa aad raacisaa kalmada “Kroger”, waxa aad u aragto, iyo hadii aad taageersan tahay ama aad diidan tahay heshiiska. Waxa aad sidoo kale ka qayb geli kartaa gudida naqdinta, koox shaqadoodu tahay inay la taliyaan OHA. Fadlan ka eeg [websaytka HCMO](#) wixii macluumaad ah ee sida aad u dalbanayso.

Waxa aad ku heli kartaa waraaqahan luuqado kale, far waawayn, farta indhoolka ama qaab kale si bilaash ah. Nalaga soo xidhiidh iimeelka [hcmo.info@oha.oregon.gov](mailto:hcmo.info@oha.oregon.gov) ama taleefanka 503-385-5948. Waxaan aqbalaynaa dhammaan wicitaannada adeegga Relay.

Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan warbixinta ama aad doonayso inaad dalbato macluumaad dheeraad ah, fadlan nagala soo xidhiidh [hcmo.info@odhsoha.oregon.gov](mailto:hcmo.info@odhsoha.oregon.gov).